

**DEEQDA LACAGTA KOONFURTA KING COUNTY (SOUTH KING COUNTY FUND) AYAA BILOWDAY WAREEGGA DEEQDA UGU HORREYSA EE DIIRADDA SAARAYSA MASHRUUCYADA KA SOO KABASHADA DEEGAANEED**

**LOGU TALAGALAY SIIDAYN DHAKHSO LEH | Agosto 3, 2020**

**Contact:** Perry Cooper | SEA Airport  
(206) 787-4923 | [cooper.p@portseattle.org](mailto:cooper.p@portseattle.org)

**SEATTLE** — Dekedda Port of Seattle ayaa bilowday wareegga hore ee Deeqda Lacagta Koonfur King County (South King County Fund) oo loo aasaasay si loogu horumariyo iskaashiyada salka ku haya sinnaanta iyo in loo fidiyo ilo iyo taageero jaaliyadaha u dhow-garoonka diyaaradaha. Dekadda ayaa ballan qaaday 10 milyan oo doolar inta u dhaxaysa hadda iyo 2023 oo la heli karo \$1 milyan laga bilaabo maanta looguna talagalay 2020. Wareegga deeq-lacageedka kowaad ayaa diiradda saari doona taageeridda ka soo kabashada deegaaneed ee saamaynta safmarenka COVID-19.

“Khalkhalka ku yimid caafimaadka iyo dhaqaalaha adduunka ayaa si aad ah u saameeyay bulshooyinkeenna arrimahaas u nugul” ayuu yiri Madaxa Guddiga (Commission President) dekadda Port of Seattle Peter Steinbrueck. “Waxaan u aasaasnay deeqda lacagta South King County Fund si wax looga qabto sinnaan la’aanta dhaqaalaheena iyo bey’addeena. Dhaqaalaha deegaaneed ayay la soo wajahay dhibaatto dhaqaale iyo caafimaad oo sii xumaanaya--Deegta Lacagta South King County Fund ayaa loogu talagalay in wax loogaga qabto sinnaan la'aanta oo loo abuurto fursado dhaqaale oo cusub halka ugu badan ee loogu baahan yahay.

Deeqda ayaa taageri doonta jaaliyadaha ay aadka u saameysay dhibaata dhaqaale ee haatan jirta iyada loo mariyo mashruucyada ku xiran meheradaha la xiriira-Dekadda, oo ay ka mid yihiin meheradaha duullimaadka, badda, dhisitaan dhismaha iyo shaqooyinka cagaaran (bad'baadada bey'ada iyo dhirta ku lug leh).

“Safmareenka COVID-19 ayaa daaha ka qaaday, oo qotodheereyay, oo ka sii darneeyay dhicisowiyada qaabdhismeedyada haatan jira iyo sinnaan-la'aanta bulsheed ee saamaynaysa dadka aan caddanka ahayn, haweenka, muhaajirinta, iyo dadka ku nool dakhliga-hooseeya,” ayuu yiri Bookda Gheisar, oo ah Agaasimaha Sare ee Xafiiska Sinnaanta, Kaladuwanaanta, iyo Ku Daritaanka. “Deeqda Lacagta Koonfurta King County ayaa qancin doonta baahii lama huraan ah oo ka jirta jaaliyadaheenna oo bartilmaamsanaysa inay taageerto qaarkood dhaqaalaha iyo xoogga shaqaalaha muhiimka ah ee la xiriira dadaallada ka jira jaaliyadaha la kulmaya saamaynta ugu badan.”

Dekedda Port of Seattle ayaa u aasaastay lacagaha deeqda South King County Fund gudahii 2019 in horumariyo iskaashiyada salka ku haya sinnaanta iyo in loo fidiyo ilo iyo taageero jaaliyadahan. Lacagta dheeqda ayaa wax ka qaban doonta yaraynta sawaxanka dheer, caafimaadka bey'ada iyo joogtaynteeda ka jirta magaalooyinka u dhow garoonka diyaaradaha.

Iyada oo laga falcelinayo saamaynta dhibatooyinka cudurka COVID-19, ayay Guddiga Dekaddu ku biirisay horumarin dhaqaale in diiraad saarid dheeraad looga dhigo lacagaha deeqda South King County Fund. Iyada oo xiriir la leh dhammaan waaxaha dhaqaalaha muhiimka ah ee Washington iyo ku xirnaan in ka badan 500 loo-shaqeeye ka hawlgala goobahayga shaqada, Dekadda ayaa kaalin lama huraa ah ku leh inay horseed u noqoto soo kabashada deegaaneed.

Deeqda ayaa soo dhawaynaysa codsiyada loogu talagalay mashaariicda la xiriira xeeladaha kaalmada meheradaha yaryar; kobcinta xoogga shaqaalaha; shaqo abuurka; ama soosaarka xeelado cusub, oo aan hore loo isticmaalin oo ku saabsan soo kabashada dhaqaalaha. Mashaariicdu waa inay u faa'iideyaan jaaliyadaha u dhow garoonka diyaaradaha, iyadoo mudnaan hore la siinayo magaalooyinka Burien, Des Moines, Federal Way, Normandy Park, SeaTac, iyo Tukwila. Mashruucyadu waa inay u adeegaan kuwa dhaqaale ahaan u nugul ee ay la soo wajahday caqabado waawayni, oo ay ka mid yihiin dadka aan caddanka ahayn, dadkii Asalka u ahaa dalka, soo haajirayaasha iyo qaxootiga, iyo kuwa Af-ingiiriiskooda xaddidan yahay, kuw ciidanka ka tirsanaan jiray, dadka waayeelka, dhallinta iyo/ama dadka naafada ah. Ururrada bulshada, rugaha ganacsiga, iyo ururrada kale ee aan samafalka ah ee ka shaqeeya aagagga barnaamijkan ayaa uqalma inay codsadaan.

Waa jira \$1 milyan maalgalin la heli karo oo ah deeq weydiisasho ilaa iyo \$100,000. Soo jeedinta waxaa la soo gudbinayaa Sebtember 30keed, 2020 12:00 duhurnimo.

Faahfaahin dheeraad ah iyo agabyada codsiga waxa laga heli karaa [www.portseattle.org/programs/south-king-county-fund](http://www.portseattle.org/programs/south-king-county-fund).

### **Ku saabsan Arrimaha Dekedda Port of Seattle**

Iyada oo lagu aasaasay 1911kii codaynta dadka sida ahaan ujeeddo dowlad oo khaas ah, dekedda Port of Seattle ayay himiladeedu tahay in loo hormariyo fursadaha dhaqaale iyo tayada nolosha ee ka jirta deegaan-waynaha iyada oo la hormariyo baayac mushtarka, socdaalka, ganacsiga, iyo shaqo abuur sinnaan leh, la iskulana xisaabtamo, oo bey'ad ahaan xilkas ah.

Dekadda ayaa iska leh oo hawlgaliso Garoonka Diyaaradaha Caalamiga ah ee Seattle-Tacoma, Fishermen's Terminal ( Seattle-Tacoma International Airport, Fishermen's Terminal)—oo hoy u ah maraakiibta kalluumaysiga ganacsiga Woqooyiga Baasifiga (North Pacific)— iyo dakadaha dadwaynaha. Dekadda ayaa walibana iska leh laba rugo markab tamashle, hanti-ma-guurto ah, rugo shixnado badeed iyada oo u marta iskaashiga ay la leedahay Northwest Seaport Alliance. Hawlaha dekedda ayay ku tiirsan yihiin ku dhawaad 200,000 shaqooyin iyo \$7 bilyan oo mushqaayadood deegaano-waynaha oo dhan. 17ka sano ee soo socda, "Ajandaha Qarniyeed" ("Century Agenda") ee dekadada ayaa raadineysaa inay abuurto 100,000 oo shaqo oo dheeri ah iyada oo loo maro kobcinta dhaqaalaha iyada oo isla markaa noqota dekedda ugu horseedsan cagaarnida iyo tamar-iskufilnaashaha qaranka. Wax intaa u dheer ka ogow [www.portseattle.org](http://www.portseattle.org).# # #

